

Waxaa cusub corona CORONA

SOMALISKA
LAMBAR 6
MEEY 2020

Hadii uu qofku ku dhaco cudurka karoona, covid-19

Inta badan dadka uu ku dhaco cudurka ma dareemaan inuu ku dhacay. Laakiin qaar baa u xanuunsada, daaweyna u baahda.

Inta badan dadka uu ku dhaco koroona fiiruska haba yaraatee ma dareemaan cudurka. Waxaa laga yaaba in uu qofku ku dhaco qufac yar ama xummad/qandho ay haleesho . Halka ay dadka qaarkood ay si'aad ah ula xanuunsadaan oo ay u baahdaan daaweyn loo dhigo dhakhtarka. Haddii uu qofku yara xanuunsanyahay, waxa uu wici karaa xarunta caafimaadka ama 1177. Int badan waxa ay yidhaahdaan waa in uu qofku joogaa aqalka illaa uu ka bogsanayo mar kale. Goortuu qofku bogsado waxa uu sii joogayaa aqalka laba maalmood oo kale ka hor inta uusan qofka dibadda u bixin.

Haddii uu qofku u baahanyahay daryeel caafimaad, waxaa muhiim ah in uu marka hore waco xarunta caafimaadka ama dhakhtarka ee uusan iska tegin. Waxaa jira nadaam gaar ah oo ay raacaan shaqaalaha caafimaadka marka ay qaabilayaan qof loo maleynayo in uu qabo cudurka karoona, covid-19. Waa muhiim in aan cudurka la qaadiin dad kale.

Haddii uu qofku aad u xanuunsanayo oo ay ku adagtahay neefsashda waa in uu wacaa 112 oo lagu soo qaadaa gaariga gar gaarka deg degga ah/ambalaans. Shaqaalaha ka shaqeeya gawaarida ambalaaska waxa ey xidhan yihiin

dhar gaashaaman. Qofka bukaanka ah oo keliya ayaa loo ogol yahay in uu raaco. Isbitaalada Kalmar iyo Västervik ayaa ah kuwa qaabilaya bukaanada la il daran caabuqa covid-19. Waa muhiim in aanan is qaadiin cudurka, sidaa darteed qofku ma soo booqan karo qof ku jira dhakhtarka.

Shaqo culus ayey hayaan shaqaalaha caafimaadka ee gobolka. Waqti badan bay shaqeeyaan waxayna u baahanyihiin iney is caawiyaan, si' ay hawshan u awoodaan. Waxaa habboon in la shaqaaleeyo kal kaaliyayaal caafimaad oo dheeraad ah oo hawshan ka fudu deeya shaqaalaha joogtada ah, suurta geliyana in shaqaalaha joogtada ahi ay helaan fasaxoodii xaggaaga. Horey waxa ay dhibaato uga jirtay helidda qalabka difaaca ee lagu isticmaalo dhakhtarrada iyo xarumaha/guryaha daryeelka dadka waaweyn, haddase arrintaasi aad bay u wanaagsantahay.

Hadda waan u helnay qalabka difaaca, shaqaalaha caafimaadka iyo dadka xanuunsanba, saa waxaa yiri Martin Olsson oo ah madaxa adeegyada gobolka. Waxaan kaloo ka shaqeyneynaa inaan helno qalab aad u badan, si haddii ay dhacdo in dad badani ay xanuunsadaan mustaqblaka aan ugu diyaar garowno.

Dad badan oo gobolka deggan baa cudurka u xanuunsan doona. Laakiin isbitaalada gobolka iyo degmooyinkuba diyaar bay u yihiin. Waanu haysanaa meelo ku filan oo dadka daryeel caafimaad u baahan la dhigo.

A rast: Covid-19 navê nexweşıya dema ku hûn bi vîrusa korona vegirtî bin.



Hay'adda ka hortaga masiibooyinka ee gobolka Kalmar waxay wada shaqen ka dhaxaysaa dhammaan degmooyinka gobolka Kalmar, Maamulka iyo dhammaan hay'adaha dawliga ee gobolka ka jira. Dhibaataada ku timaada mujtamaca wadajir ayaa loo go'aamiyaa la iskana kaashada. Hadda waxaa intii suurtoogala si fiican loola tacaalaya cudurka corona.



VÄSTERVIKS
KOMMUN



facebook.com/krissamverkan.kalma
facebook.com/vastervikskommun